

## PATIENT EDUCATION

# Qaliinka Dhuunta (Halo Ablation)

### Waa maxay Qaliinka Dhuunta?

Qaliinka Dhuunta waa daaweynta cudurka hawa mareenka ee gidaarka hawo mareenka casaanka ka dhiga. Qaliinka Dhuunta wuxuu isticmaalaa kuleylka tamarta si uu u baabi'iyo unugyada xanuunsan ee hawa mareenka.

- Qaliinka Dhuunta waxaa la sameeyaa inta lagu jiro baaritaanka tuubada caloosha ee afka la geliyo (EGD).
- Daaweynta waxaa loo qaataa sida bukaan socodka.
- Lama daloolin doono xubnaha jirka.

### Sidee iskugu diyaariyaa baaritaanka Qaliinka Dhuunta?

- Xaqiji inaad raacdip tilmaamaha la xiriira cuntada aad cuneysa oo dhakhtarku ku siiyey.
- Qaar kamid ah daawada aad qaadato waxaa laga yaabaa in loo baahdo in la joojiyo oo wax looga badelo si kumeel gaar ah. Waa inaad kala hadasho dhammaan daawooyinka dhiiga khafiifiya, insuliinta, ama daawooyinka cudurka sonkorta dhakhtarka kuu qora ugu yaraan 2 asbuuc kahor pH Qaliinka Dhuunta. Ha joojin qaadashada daawooyinkaan adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- Xaqiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay kahor maalinta Qaliinka.

### Waa maxay waxyeelada ka dhalan karta ee suurtagalka ah?

- Waxyeelada caafimaada ee aan wanaagsaneyn ee laga dhaxlo daawada suuxdinta.
- Jeexdinta ku timaadda darbiga hunguriga, caloosha, ama mindhicirada yaryar.
- Dhiig bax.
- Dhuubashada (duuubashada dhuunta).
- Xanuun ka dhasha baaritaanka sida wadno xanuun ama xanuun qofku ka dareemo xabadka.
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan waydii dhakhtarkaaga.

### Maxay tahay inaan fisho kahor qaliinka dhuunta?

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharaxi doonaa khataraha iyo faa'idooyinka laga dhaxlo qaliinka dhuunta.
- Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaansho oo la xariira qaliinka.
- Daawo yar ee laga qaato xididka IV ayaa lagaaga xiri doonaa xididka si laguu siiyo daawada kabuubisa inta lagu jiro qaliinka.
- Waa la bixin doonaa qalabyada iyo ookiyaalayaasha kahor qaliinka.

### Maxa aan filan karo inta lagu jiro hawsha qaliinka dhuunta?

- Waxaad u seexan doontaa dhanka bidix.
- Waxaa lala socon doonaa heirarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga, neefsashada iyo ogsijiinta inta qaliinka socdo.
- Dhakhtarkaaga ayaa hawo gelin doona calooshaada si guud ahaan aagga loo arko.
- Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daawo loo yaqaan Mucomyst inta lagu jiro qaliinka.

### Maxa aan filan karo kadib qaliinka dhuunta?

- Waxaa lala socon doonaa heirarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga, iyo neefsashada inta aad joogto goobta soo kabashada.
- Waxaa laga yaabo inuu ogsijiin kugu xirnaado muddo gaaban.
- Inta badan bukaanadu waxay la kulmaan wadne xanuun ama xanuun ay ka dareemaan xabadka. Sidoo kale waxaad isku arki kartaa Lalabo ama dhuun xanuun. Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daawooyin kaa

caawiya xanuunka, lalabada, iyo wadne xanuunka. Dhakhtarkaagu wuxuu sharaxi doonaa sida iyo goorta la isticmaalo daawooyinkaan waqtiga isbitaal ka bixista haddii loo baahan yahay kadibbaaritaanka.

- Qoyskaaga iyo saaxiibadaa ayaa kula joogi kara kadibbaaritaanka.
- Haddii aad qaadato Coumadin, Plavix, ama daawo kale oo dhiiga khafiifisa, waydii dhakhtarkaaga goorta aad dib u bilaabi karto.
- Iska ilaali inaad cunto aspirin ama daawooyinka yareeya xanuunka caabuqyada muddo todobo maalmood ah.
- Wuxaaad u baahan doontaa inaad raacdoo ood cunto cuno dareere ah oo buuxa muddo 24 saacadood ah kadibna aad u gudubto cunto jilicsan hal toddobaad kadib.
- Kalkaalisada ayaa ku siin doonta tilmaamaha isbitaal ka bixista oo qoraal ah kahor inta aadan bixin.

#### **Tixraacyada**

Buug yaraha Cudurka Dhuunta (Barrett's Esophagus Brochure.) BARRX Medical - [www.barrx.com](http://www.barrx.com)